DOWLADDA PUNTLAND
EE SOOMAALIYA
XAFIISKA
GARYAQAANKA GUUD

ولاية بونت لاند
الصومالية
مكتب
المحامي العام للدولة

PUNTLAND STATE OF SOMALIA
OFFICE OF THE SOLICITOR GENERAL

SANADKA 26AAD	CADADKA 9AAD	TAARIIKH: 1/9/26	Lam. 04

FAAFINTA RASMIGA AH
OFFICIAL GAZETTE
الجريدة الرسمية

Ansixinta wax–ka–bedelka Sharciga Diiwaangelinta Codbixiyaha Dowladda Puntland

TUSMADA	
Qeybta 1aad	*Xeerarka Baarlamaanka iyo Heshiisyada Caalamiga ah* **Ansixinta wax–ka–bedelka Sharciga Diiwaangelinta Codbixiyaha Dowladda Puntland**
Qeybta 2aad	*Xeerarka iyo Digreetooyinka Madaxweynaha.* *WAXBA MALEH*
Qeybta 3aad	*Xeer Nidaamiyeyaasha Wasaaradaha, Xeerarka Goleyaasha Deegaanka iyo Barnaamijyada Dowladda.* *WAXBA MALEH*
Qeybta 4aad	Go'aanmada Maamulada iyo Qaraarada Maxkamadaha. WAXBA MALEH
Qeybta 5aad	Amarada, Ogeysiisyada iyo Qandaraasyada Dowladda. WAXBA MALEH

DOWLADDA PUNTLAND
EE SOOMAALIYA

XAFIISKA
MADAXWEYNAHA

ولاية بونت لاند
الصومالية

مكتب
الرئيس

PUNTLAND STATE OF SOMALIA
OFFICE OF THE PRESIDENT

Sharci Lr. 005 ee 1-da September 2026, kuna saabsan Ansixinta wax-ka-bedelka Sharciga Diiwaangelinta Codbixiyaha Dowladda Puntland.

Madaxweynaha Dowladda Puntland

Markuu arkay: Dastuurka Dowladda Puntland Qodobkiisa 80-aad farqadiisa 16-aad.

Markuu arkay: Ansixinta Golaha Wakiilada Dowladda Puntland ee Summadeedu tahay XGGW/DPL/31/2026, kuna taariikhaysan 4-tii August 2026.

Markuu Tixgeliyey: Baahida loo qabo Ansixinta Sharciga Diiwaangelinta Codbixiyaha Dowladda Puntland.

Wuxuu soo saaray

Sharciga soo socda:

Qodobka 1aad

Golaha Wakiiladu waxay ansixiyeen Sharciga Diiwaangelinta Codbixiyaha Dowladda Puntland.

Qodobka 2aad

Nuqulada asalka ah (Original) waxaa lagu kala kaydinayaa Xafiiska Madaxweynaha, Xafiiska Xoghayaha Guud ee Baarlamaanka iyo Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dowladda.

Qodobka 3aad

Dhaqangalka Sharcigani wuxuu noqonayaa markuu Madaxweynuhu saxiixo laguna soo saaro faafinta rasmiga ah ee Dowladda Puntland.

Siciid Cabdullaahi Deni
Madaxweynaha Dawladda Puntland

Office of the President
Puntland State of Somalia

Tell: +252-090-6809612; E-mail: dg.oop@plstate.so, oop@plstate.so; Website: www.plstate.so

DAWLADDA PUNTLAND
EE SOOMAALIYA

GOLAHA WAKIILLADA

ولاية بو نت لاند الصومال

مجلس النواب

Xafiiska Guddoomiyaha
Office of the Speaker

Tix:-XGGW/DPL/31/2026 **Garoowe, Isniin,** **Taariikh: - 04/08/2026**

Ku:- Madaxweynaha Dawladda Puntand **Garoowe**

Ujeeddo:-Ansixinta Wax-ka-beddelka Xeerka Diiwaangelinta Codbixiyaha Dawladda Puntland

Mudane Madaxweyne,

GUDDOOMIYAHA GOLAHA WAKIILLADU: -

MARKUU ARKAY:- Qodobada **60-aad (1), 64-aad (1), 68-aad(t)** iyo **70-aad (1)** ee Dastuurka Dawladda Puntland.

MARKUU ARKAY:- Qodobadda **2-aad (1), 3-aad (1), 57-aad(2)** iyo **58-aad** ee Xeer-hoosaadka Golaha Wakiillada Dawladda Puntland.

MARKUU ARKAY:- Soo gudbinta Madaxweynaha Ref: MW/DPS/136/2026 ee June 21, 2026, kuna saabsan wax-ka-beddelka Xeerka Diiwaangelinta Codbiyaha Dawladda Puntland.

MARKUU TIX-GELIYEY: - Baahida loo qabo Wax-ka-beddelka Iyo Kaabista Xeerka Diiwaangelinta Codbixiyaha Dawladda Puntland.

MARKUU DHEGEYSTEY: - Dooddii iyo Go'aankii Golaha Wakiilladu kalfadhiga 58-aad, Fadhigiisii 15-aad ee 14.07.2026 cod gacanta tag ah ku Ansixiyeen wax-ka-beddelka Xeerka Diiwaangelinta Codbixiyaha Dawladda Puntland. Guntanka fadhiga oo ahaa (**38**) Mudane, waxaa ugu codeeyey oggol (**31**) Mudane, Diidmo (**2**) Mudane, majirin, halka ay ka aamuseen (**5**) Mudane.

WUXUU GUDDOOMIYEY:-

Ansixinta Wax-ka-beddelka Xeerka Diiwaangelinta Codbixiyaha Dawladda Puntland.

Wada Shaqeyn Wacan

Md. Cabdirisaaq Axmed Siciid
Guddoomiyaha Golaha Wakiillada DPL.

XAFIISKA GUDDOOMIYAHA GOLAHA WAKIILADA DAWLADDA PUNTLAND
OFFICE OF THE SPEAKER OF PUNTLAND STATE HOUSE OF REPRESENTATIVES



DAWLADDA PUNTLAND EE SOOMAALIYA
GOLAHA WAKIILLADA PUNTLAND

WAX-KA-BEDDELKA XEERKA DIIWAANGELINTA COD-BIXIYAHA DAWLADDA PUNTLAND

Luulyo, 2026

TUSMO

CUTUBKA 1-AAD i
QODOBO HORDHAC AH 1
Qodobka 1-aad 1
Magaca Xeerka 1
Qodobka 2-aad 1
Erey-Bixin 1
Qodobka 3-aad 1
Ujeeddada Xeerka 2
Qodobka 4-aad 2
Mabaadi'da Xeerka 2
Qodobka 5-aad 2
Baaxadda Xeerka 3
CUTUBKA 2-AAD 3
HANNAANKA DIIWAANGELINTA 3
Qodobka 6-aad 3
Awoodaha iyo Mas'uuliyadaha Guddiga Doorashooyinka ee la Xiriira Diiwaangelinta 3
Qodobka 7-aad 4
Dadka Xaqa U leh Is-Diiwaangelinta 4
Qodobka 8-aad 5
Xuquuqda Cod-bixiyaha 5
Qodobka 9-aad 5
Ansax Ahaanta Kaadhka Cod-Bixinta 5
Qodobka 10-aad 5
Xogta Foomka Diiwaangelinta 5
Qodobka 11-aad 6
Habka Diiwaangelinta 6
Qodobka 12-aad 6
Wakhtiga iyo Saacadaha Diiwaangelinta 6
Qodobka 13-aad 6
Goobaha Diiwaangelinta Cod-bixiyayaasha 6

GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR
المحامي العام للدولة

CUTUBKA 3-AAD 7
KAALINTA URURRADA/XISBIYADA, GOOB JOOGAYAASHA IYO SAXAAFADDA EE LA XIRRIIRA DIIWAANGELINTA 7
Qodobka 14-aad 7
Wakiillada Ururrada iyo Xisbiyada 7
Qodobka 15-aad 7
Goob-joogayaasha 7
Qodobka 16-aad 7
Saxaafadda 7
CUTUBKA 4-AAD 8
HIRGELINTA DIIWAANGELINTA 8
Qodobka 17-aad 8
Sugidda Amniga 8
Qodobka 18-aad 8
Xiritaanka Hawsha Diiwaangelinta iyo Wareejinta Agabka 8
Qodobka 19-aad 9
Liisaska Hordhaca ah ee Diiwaangelinta 9
Qodobka 20-aad 9
Cabashooyinka La Xiriira Liisaska Hordhaca ah 9
Qodobka 21-aad 10
Foomka Cabashada 10
Qodobka 22-aad 10
Wakhtiga La Gudbin Karo Cabasho 10
Qodobka 23-aad 10
Go'aan Ka Gaarista Cabashooyinka La Xiriira 10
Liisaska Hordhaca ah 10
Qodobka 24-aad 11
Guddiga Xallinta Cabashooyinka Diiwaangelinta 11
Cod-bixiyayaasha 11
CUTUBKA 5-AAD 11
SOO SAARISTA LIISKA KAMA DAMBAYSTA AH EE DIIWAANGELINTA 11
Qodobka 25-aad 11

GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR
المحامي العام للدولة

Diiwaanka Cod-bixiyayaasha ee Kama Dambaysta ah 11
Qodobka 26-aad 12
Kaadhka Cod-Bixiyaha 12
Qodobka 27-aad 12
Qaybinta Kaadhka Cod-Bixinta 12
Qodobka 28-aad 12
Lumista Kaadhka Cod-Bixinta 12
Qodobka 29-aad 13
Wax-Ka-Beddelka Diiwaanka Cod-bixiyaha Rasmiga ah 13
Qodobka 30-aad 13
Waxyaabaha ka Reebban Cod-bixiyaha 13
Qodobka 31-aad 13
Xogta Khaldanta 13
CUTUBKA 6-AAD 14
WACYI-GELINTA DIIWAANGELINTA 14
Qodobka 32-aad 14
Wacyi-Gelinta Diiwaangelinta Cod-bixiyayaasha 14
Qodobka 33-aad 14
Tiirarka Wacyi-gelinta 14
CUTUBKA 7-AAD 15
QODOBO GUUD 15
Qodobka 34-aad 15
Lahaanshaha iyo Haynta Diiwaanka 15
Qodobka 35-aad 15
Ciqaabaha La Xiriira Xad-gudubyada Diiwaangelinta 15
Qodobka 36-aad 15
Reebbanaanta Olole Ka samaynta Goobta Diiwaangelinta 15
Qodobka 37-aad 16
Xeer-Nidaamiyeyaal 16
Qodobka 38-aad 16
Burin 16
Qodobka 39-aad 16
Dhaqan-galka Xeerka 16

GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR

CUTUBKA 1-AAD
QODOBO HORDHAC AH
Qodobka 1-aad
Magaca Xeerka

Xeerkan waxaa lagu magacaabaa Xeerka Diiwaangelinta Cod-bixiyaha Dawladda Puntland.

Qodobka 2-aad
Erey-Bixin

Xeerkan gudihiisa haddii aan si kale loo fasirin, ereyada soo socda waxaa micnahoodu noqonayaa sidan: -

No	Erayga	Macnaha
1	Dawladda	Waxaa loola jeedaa Dawladda Puntland ee Soomaaliya.
2	Dastuur	Waxaa loola jeedaa Dastuurka Dawladda Puntland.
3	Wasiir	Waxaa loola jeedaa Wasiirka Arrimaha Gudaha, Federaalka iyo Dimuqraadiyeynta Dawladda Puntland.
4	Wasaaradda	Waxaa loola jeedaa Wasaaradda Arrimaha Gudaha, Federaalka iyo Dimuqraadiyeynta Dawladda Puntland.
5	Guddi	Waxaa loola jeedaa Guddiga Doorashooyinka Puntland.
6	Muwaadin	Waxaa loola jeedaa qof kastoo buuxiyey shuruudaha ku xusan Dastuurka Puntland.
7	Cod-bixiye	Waxaa loola jeedaa muwaadin kasta oo xaq u leh inuu cod-bixiyo, buuxiyeyna shuruudaha ku cad xeerkan iyo Dastuurka Dawladda Puntland.
8	Guddooomiye Gobol	Waxaa loola jeedaa Guddoomiyaha Guddiga Doorashada heer Gobol.
9	Guddoomiye Degmo	Waxaa loola jeedaa Guddoomiyaha Guddiga Doorashada heer Degmo.
10	Guddoomiyaha Goobta	Waxaa loola jeedaa Hawl-wadeenka Guddiga Doorashada ee ugu sarreeya Goob diiwaangelin.
11	Kaadhka Aqoonsiga	Waxaa loola jeedaa kaadhka aqoonsiga Muwaadinnimo.
12	Kaadhka Cod-bixinta	Waxaa loola jeedaa kaadhka la siiyo cod-bixiyaha marka la diiwaangeliyo.
13	Wakiil Urur/Xisbi	Waxaa loola jeedaa xubinta uu Urur/xisbi siyaasadeed u soo magacaabo inuu wakiil uga noqdo goobaha Diiwaangelinta Cod-bixiyayaasha.
14	Goob-joogayaal	Waxaa loola jeedaa kormeerayaasha Caalamiga ah iyo kuwa maxalliga ah ee hubinaya habsami u socodka Doorashooyinka.

GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR

15	Diiwaangelinta Muwaadinka	Waxaa loola jeedaa Diiwaangelinta muwaadin kasta oo reer Puntland ah oo ay samaysay Wasaaradda Arrimaha Gudaha.
16	Cod-bixiyaha	Waxaa loola jeedaa muwaadiniinta isu diiwaangeliya in ay codeeyaan xilliga Doorashooyinka Puntland uuna diiwaangeliyey Guddiga Doorashooyinka Puntland.
17	Diiwaanka Guud	Waxaa loola jeedaa diiwaanka la dhigo xarumaha Wasaaradda iyo Guddiga Doorashooyinka, laguna kaydiyo xogta muwaadniinta iyo Cod-bixiyayaasha.
18	Diiwaanka	Waxaa loola jeedaa diiwaanka lagu qoro xogta muwaadiniinta, warqadda aqoonsiga iyo Cod-bixiyayaasha ee goob doorasho kasta.
19	Diiwaan-gelin	Waxaa loola jeedaa Liisaska Cod-bixiyayaasha ee uu diiwaangeliyo Guddiga Doorashooyinka Puntland.
20	Guddiga Xallinta Cabashooyinka	Waxaa loola jeedaa Guddiga awooda u leh go'aan ka gaaridda cabashooyinka la xiriira Diiwaangelinta Cod-bixiyayaasha.
21	Xeerka Ciqaabta	Waxaa loola jeedaa Xeerka Ciqaabta Soomaaliyeed Xeer (Lr.5) soona baxay sannadkii 1962.

Qodobka 3-aad
Ujeeddada Xeerka

Ujeeddooyinka xeerkani waa: -

1. In la helo Xeer lagu nidaamiyo hawlaha Diiwaangelinta Cod-bixiyayaasha Dawladda Puntland.
2. In la hirgeliyo lana ilaaliyo xuquuqda Siyaasadeed ee muwaadiniinta sida ku xusan Dastuurka.
3. In la helo hannaan is-diiwaangelin Doorasho oo hufan, baahsan oo loo siman yahay.
4. In la kordhiyo kalsoonida shacabka ee ku aaddan hannaanka is-diiwaangelinta.

Qodobka 4-aad
Mabaadi'da Xeerka

Mabaadi'da xeerkani waa: -

1. Ku dhaqanka Shareecada Islaamka, Dastuurka, Xeerarka kale ee Puntland iyo Ilaalinta Dhaqanka Suubban.
2. Sugnaanta, Hufnaanta, Daahfurnaanta, Baahsanaanta iyo Madax-Bannaanida Muwaadiniinta Cod-bixiyayaasha.

CANYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR

Qodobka 5-aad
Baaxadda Xeerka

Xeerkan waxaa lagu maamulayaa guud ahaan Arrimaha Diiwaangelinta Cod-bixiyayaasha Dawladda Puntland.

CUTUBKA 2-AAD
HANNAANKA DIIWAANGELINTA

Qodobka 6-aad
Awoodaha iyo Mas'uuliyadaha Guddiga Doorashooyinka ee la Xiriira Diiwaangelinta

Iyadoon wax loo dhimayn awoodaha Guddiga ee ku xusan Dastuurka iyo Qawaaniinta kale ee Doorashooyinka, Xeerkan wuxuu awood u siinayaa Guddiga:-

1. Dejinta qorshaha diiwaangelinta.
2. Isku dubbaridka barnaamijyada wacyigelinta dadweynaha ee ku aaddan diiwaangelinta.
3. Ilaalinta xogta, kaydinta, hubinta, sixidda, cusboonaysiinta, soo saarista liisaska hordhaca ah iyo kuwa kama dambaysta ah ee diiwaanka Cod-bixiyayaasha.
4. Qorsheynta, hirgelinta iyo maaraynta xarumaha Diiwaangelinta ee Gobollada iyo Degmooyinka Puntland, iyadoo goobaha Diiwaangelintana lagu jaangoynayo tirada iyo baahida deegaan kasta.
5. Go'aan ka gaaridda cabashooyinka la xiriira diiwaanka Cod-bixiyayaasha ee Puntland.
6. Shaqaaleynta Hawl-wadeennada Diiwaangelinta Cod-bixiyayaasha Puntland.
7. Hindisidda hab-raacyo iyo buug-gacmeedyo la xiriira hannaanka Diiwaangelinta Cod-bixiyayaasha.
8. Soo diyaarinta Miisaaniyadda lagu fulinayo hawlaha Diiwaangelinta Cod-bixiyayaasha, si waafaqsan Xeerka Guddiga Doorashooyinka.

GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR

Qodobka 7-aad
Dadka Xaqa U leh Is-Diiwaangelinta

1. Qof kasta oo isku diiwaangelinaya cod-bixiye waa inuu buuxiyaa shuruudaha soo socda:-

   b. Waa inuu yahay muwaadin Soomaali ah u dhashay Puntland ama warqadda aqoonsiga Puntlandnimo ku helay sifo sharci ah sida uu qabo qodobka 5 (1) ee Dastuurka.

   t. Muwaadin Soomaaliyeed oo Puntland deganaa shantii (5) sanno ee u dambaysey.

   J. Waa in aan da'diisu ka yarayn shan iyo toban (15) sanno.

   x. Waa inuu maskax ahaan fiyow yahay.

   Kh. Waa inaan shantii (5) sano ee ugu dambaysey Maxkamad awood u lihi si kama dambays ah ugu xukumin dembi culus, oo ay raacisay inay laalan yihiin xuquuqdiisii siyaasadeed iyo inuusan qaban karin xafiis/jago dawladeed.

2. Muwaadinnimada qofka, waxaa saldhig u ah inuu leeyahay mid ka mid ah dukumintiyada soo socda:
   b. Waraaq dhalasho oo la aqoonsan yahay.
   t. Kaadhka aqoonsiga Puntland.
   j. Baasaboor Soomaali ah.
3. Qof kasta oo isu diiwaangelinaya cod-bixiye Doorashooyinka Puntland, waa inuu sitaa warqadda aqoonsiga Puntland-nimada.
4. Qofka aan sidan Dukumintiyada ku xusan farqada 2-aad ee qodobkan, waxaa muwaadinnimadiisa xaqiijinaya Nabadoonka reerkiisa ama odayaasha Deegaanka oo warqad caddayn ah ka soo qaadanaya Degmada, ayaa hor imanaya xafiiska diiwaangelinta una markhaati furaya.

GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR
المحامي العام للدولة

Qodobka 8-aad
Xuquuqda Cod-bixiyaha

Cod-bixiye kasta oo buuxiyey shuruudaha cod-bixinta wuxuu xaq u leeyahay:-

1. Inuu codkiisa ka dhiibto goobta uu cod-bixiye ahaan uga diiwaangashan yahay.
2. Codku waa inuu ahaado mid shakhsi ah, xor ah, toos ah, qarsoodi ah oo si siman loo tixgeliyo.
3. Cod-bixiye kasta wuxuu leeyahay hal cod oo keliya doorashadiiba.
4. Xubnaha Guddiga Doorashooyinku waxay isu diiwaangalin karaan cod-bixiye ahaan, mana laha xaqa cod-bixinta inta ay xilka hayaan.
5. Hawl-wadeennada Guddiga ee goobta cod-bixinta,Wakiillada Ururrada/Xisbiyada korjoogtada maxaliga ah iyo Ciidanka Booliska ee sida rasmiga ah ugu xilsaaran ilaalinta nidaamka doorashada waxay ka codayn karaan goobta cod-bixineed ee ay ka hawl-gelayaan maalinta cod-bixinta, iyadoo codkiisa loo tirinayo meesha uu iska diiwaangeliyey cod-bixiyuhu.

Qodobka 9-aad
Ansax Ahaanta Kaadhka Cod-Bixinta

Kaadhka codbixintu wuxuu ansax yahay muddo (10) sano ah laga bilaabo maalinta la bixiyey.

Qodobka 10-aad
Xogta Foomka Diiwaangelinta

1. Xogaha mudan tixraac waa kuwa ku xusan foomka Diiwaangelinta ee cod-bixinta.
2. Foomka Diiwaangelinta waxaa lagu qorayaa xogaha hoos ku qoran ee Cod-bixiyaha:-

b.Magaca Cod-bixiyaha oo afaran una qoran si sax ah.
t. Sannadka, Bisha, Maalinta uu dhashay iyo goobta uu ku dhashay.
j. Magaca Hooyada oo saddexan.
x. Lab ama dhedig.
kh. Gobolka, Degmada iyo goobta diiwaangelinta cod-bixiyaha.
d. Goob-doorasho, Degmo iyo Gobol ee cod-bixiyuhu ka dhiibanayo codkiisa.
r. Sawirka cod-bixiyaha.
s. Saxiixa cod-bixiyaha ama tilmaan tusaysa in aanu cod-bixiyuhu saxiixi karayn.
sh. Lambarka gaarka ah ee lagu diiwaangeliyay cod-bixiyaha (Taleefan).
dh. Lambarka tixraaca Diiwaangelinta cod-bixiyaha.

GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA
STATE GENERAL SOLICITOR
المحامي العام للدولة

c. Wakhtiga uu dhacayo.

3. Guddigu wuxuu awood u leeyahay inuu ku daro foomka Diiwaangelinta, xog kasta oo muhiim u noqon karta qabsoomidda doorashada, iyadoo lagala-tashanayo Urrurada/xisbiyada siyaasadda.

Qodobka 11-aad
Habka Diiwaangelinta

1. Muwaadin kasta oo diiwaangashan, lana guddoonsiiyey kaadhka cod-bixinta, wuxuu xaq u leeyahay inuu codeeyo.
2. Ma jirto wax lacag ah oo laga qaadayo qofka is diiwaangelinaya.
3. Guddigu wuxuu soo saarayaa liiska dadka is diiwaangeliyey ugu yaraan labo (2) bilood ka hor maalinta Doorashada.
4. Muwaadinka lumiyey fursada Diiwaangelinta, wuxuu isu diiwaangelin karaa Doorashada xigta.

Qodobka 12-aad
Wakhtiga iyo Saacadaha Diiwaangelinta

1. Guddiga ayaa shan iyo toban (15) cisho ka hor wakhtiga Diiwaangelinta wareegto ku soo saarayaa taariikhda ay bilaabaneyso diiwaangelintu.
2. Hawl-maalmeedka goobta Diiwaangelinta waxaa la bilaabayaa 6:00-am subaxnimo, waxayna ku dhammaanaysaa 6:00-pm fiidnimo.
3. Diiwaangelintu way soconeysaa oo wakhtiga xiritaanka la tixgelin maayo haddii ay jiraan muwaadiniin aan weli la diiwaangelin oo safka taagan ilaa ay ka dhammaanayaan.

Qodobka 13-aad
Goobaha Diiwaangelinta Cod-bixiyayaasha

1. Waxaa deegaannada Puntland loo qaybinayaa goobo diiwaangelineed, si waafaqsan Gobollada ay Puntland ka kooban tahay.
2. Guddiga Doorashooyinka ayaa cayimaya goobaha Diiwaangelinta Cod-bixiyayaasha ee Gobol iyo Degmo kasta.
3. Guddigu wuxuu dejinayaa nidaam lagu kala garto goobaha Diiwaangelinta, iyadoo uu siinayo goob kasta tirsi lambar (code) oo gaar u ah.

GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR

CUTUBKA 3-AAD

KAALINTA URURRADA/XISBIYADA, GOOB JOOGAYAASHA IYO SAXAAFADDA EE LA XIRRIIRA DIIWAANGELINTA

Qodobka 14-aad
Wakiillada Ururrada iyo Xisbiyada

1. Urur/xisbi kasta wuxuu xaq u leeyahay inuu u soo magacawdo hal (1) wakiil goobta Diiwaangelinta, kaasoo u-xilsaaran hubinta in hannaanka diiwaangelintu uu Xeerka waafaqsan yahay.
2. Ururka/xisbiga waa in ay soo magacaabaan wakiillada labaatan iyo kow (21) maalmood ka hor wakhtiga Diiwaangelinta.
3. Guddigu kaadh aqoonsi wakiilnimo ayuu siinayaa wakiillada Ururrada/xisbiyada siyaasadda.
4. Guddigu wuxuu la saxiixanayaa wakiillada Ururrada/xisbiyada heshiis in uu wakiil walba xushmaynayo anshaxa goobta Diiwaangelinta.
5. Guddigu wuxuu ka fogeyn karaa goobta Diiwaangelinta wakiilka ku kaca falal lid ku ah anshaxa iyo amniga goobta.

Qodobka 15-aad
Goob-joogayaasha

1. Goob-joogayaal ka socda gudaha iyo dibadda oo oggolaansho ka haysta Guddiga ayaa kor-joogtayn kara hawsha Diiwaangelinta.
2. Goob-joogayaashu waxay tegi karaan goob kasta oo diiwaangelin laga samaynayo, iyagoo raacaya tusmooyinka Guddiga Doorashooyinka.
3. Guddigu waxay goob-joogayaasha siinayaan kaadh aqoonsi goob-joogenimo.

Qodobka 16-aad
Saxaafadda

1. Saxaafadda Maxalliga ah iyo mida Caalamiga ahi waxay la socon karaan, isla markaana baahin karaan hawlaha Diiwaangelinta Cod-bixiyayaasha.
2. Saxaafadda ka haysata oggolaanshaha Guddiga, waxay geli karaan goobaha Diiwaangelinta wakhtiyada ay shaqadu socoto, waana in ay sitaan kaadhadhka aqoonsiga.
3. Saxaafadda Guddigu u oggolaado tebinta hawlaha Diiwaangelinta, waa in ay dhowraan Xeerkan iyo Xeerka Warbaahinta Puntland, ayna xushmeeyaan anshaxa goobta diiwaangelinta.

GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR
المحامي العام للدولة

CUTUBKA 4-AAD
HIRGELINTA DIIWAANGELINTA

Qodobka 17-aad
Sugidda Amniga

1. Guddigu wuxuu kala tashanayaa Wasaaradda Amniga iyo Taliska Booliiska, qaabka ugu habboon ee loo diyaarin karo ciidan suga amniga hawl-wadeennada iyo goobaha Diiwaangelinta.
2. Guddigu wuxuu wacyigelin siinayaa ciidanka u xil-saaran amniga goobaha Diiwaangelinta.

Qodobka 18-aad
Xiritaanka Hawsha Diiwaangelinta iyo Wareejinta Agabka

1. Marka ay dhammaato hawsha Diiwaangelinta, Guddoomiyaha goobtu wuxuu diyaarinayaa wadarta tirada Cod-bixiyayaasha la diiwaan-geliyey, wuxuuna ku ridayaa baqshadaha loogu tala galay.
2. Guddoomiyaha goobtu wuxuu gal gaar ah ku ridayaa tirada foomamka xumaaday iyo diidmooyinka la bixiyey.
3. Baqshadaha waa la lingaxayaa, korkana waxaa looga dhufanayaa shaabadda goobta, waxaana korka wadajir uga saxiixaya Guddoomiyaha goobta iyo Xog-geliyaha.
4. Baqshadaha korkooda waxaa lagu qorayaa faallo ku saabsan waxa ku xafidan.
5. Guddoomiyaha goobta Diiwaangelinta oo ugu yaraan ay la socdaan xubin hawlwadeennada ka tirsan iyo boolis ilaalo ah ayaa qaadaya qalabka, qoraalka raadraaca ah iyo baqshadaha goobta kuna wareejinaya xafiiska Diiwaangelinta ee degmada muddo aan ka badnayn 12-saacadood marka ay diiwaangelintu dhammaato, waana in Guddoomiyaha Degmadu bixiyo caddeynta la wareegista agabka.
6. Xafiiska degmadu waa inuu qalabka qoraalka raadraaca ah iyo baqshadaha goobaha ku wareejiyaa xafiiska gobolka muddo aan ka badnayn 24 saacadood marka ay soo gaadhaan agabka farqada 5-aad ku xusan, waana in Guddoomiyaha Gobolku bixiyo caddeynta la wareegista agabka.

GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR
المحامي العام للدولة

Qodobka 19-aad
Liisaska Hordhaca ah ee Diiwaangelinta

1. Marka ay dhammaato muddada Diiwaangelinta, Guddiguna xaqiijiyo in ay si habsami ah hawshu u dhacday, wuxuu si hordhac ah u soo saarayaa liisaska Cod-bixiyayaasha.
2. Liisaska hordhaca ah ee Cod-bixiyayaasha waxaa loo diyaarinayaa goob kasta oo codbixineed. Diiwaanka Liisaska Cod-bixiyayaasha waxaa lagu muujinayaa tirada cod-bixiyaha iyo xogta goobta cod-bixinta.
3. Liisaska Cod-bixiyayaasha ee hordhaca ah, wuxuu Guddigu soo dhejinayaa kadib marka uu dhammaystiro Diiwaangelinta dhammaan Gobollada.
4. Guddigu wuxuu soo dhejinayaa liisaska cid kasta oo hal mar wax ka badan is-diiwaangelisey.

Qodobka 20-aad
Cabashooyinka La Xiriira Liisaska Hordhaca ah

1. Marka la soo saaro liisaska hordhaca ah ee Cod-bixiyayaasha, waxaa cabasho laga qaban karaa qofkii haysta waraaqda aqoonsiga cod-bixiye.
2. Cabashooyinka mudnaanta leh waa kuwa la xiriira arrimaha soo socda: -
   b. Haddii cod-bixiyaha lagu qoray goob cod-bixin oo aan ahayn tii uu doortay.
   t. Haddii aan la diiwaangelin, ama la waayo muwaadin haysta caddayn in uu buuxiyey shuruudihii.
3. Cabashada waa in lagu soo gudbiyaa foomka loogu talo galay ee ku kaydsan goobaha Diiwaangelinta.
4. Ururrada/xisbiyada siyaasadu waa in ay cabashada ku soo gudbiyaan todoba (7) cisho gudahood oo ka bilaabmata maalinta ay soo baxeen liisaska hordhaca ah ee Cod-bixiyayaasha.
5. Urrurada/xisbiyada siyaasaddu waxay ka caban karaan arrimaha soo socda: -
   b. In la diiwaangeliyey dad aan buuxin shuruudaha Cod-bixiyayaasha ee ku xusan qodobka 7-aad ee xeerkan.
   t. In aan la diiwaangelin dad buuxiyey shuruudihii cod-bixinta ee ku xusan qodobka 7-aad ee xeerkan.

GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR
المحامي العام للدولة

Qodobka 21-aad
Foomka Cabashada

1. Guddigu waa inuu hubiyaa inay goob kasta ku diyaarsan yihiin foomamka cabashada.
2. Guddiga Doorashooyinku wuxuu magacaabayaa Guddiga Xallinta Cabashooyinka Diiwaangelinta Cod-bixiyayaasha.
3. Guddoomiyaha Gobolku haddii aanu wax ka qaban karin cabashada, waa inuu u wareejiyaa Guddiga Xallinta Cabashooyinka Diiwaangelinta muddo aan ka badnayn, afartan iyo sideed saacadood (48).
4. Qof kasta oo ku qanci waaya go'aanka xafiiska heer Gobol, wuxuu xaq u leeyahay inuu cabashadiisa u gudbiyo Guddiga Xallinta Cabashooyinka Diiwaangelinta.
5. Qof kasta oo ku qanci waaya go'aanka Guddiga Xallinta Cabashooyinka Diiwaangelinta Cod-bixiyayaasha, waxay dacwo ka furan kartaa Maxkamadda awoodda u leh.

Qodobka 22-aad
Wakhtiga La Gudbin Karo Cabasho

Cid kasta oo ka cabanaysa xogta ku qoran liisaska hordhaca ah, waa inuu cabashadiisa ku gudbiyaa todoba (7) cisho gudahood, laga bilaabo maalinta la soo saarey liisaska hordhaca ah.

Qodobka 23-aad
Go'aan Ka Gaarista Cabashooyinka La Xiriira Liisaska Hordhaca ah

1. Cabashooyinka la xiriira liisaska hordhaca ah, waxaa go'aan ka gaaraya maamulka Guddiga heer gobol, una gudbinaya Xarunta Dhexe ee Guddiga, si loo saxo khaladaadka saldhigga u ah cabashada.
2. Haddii cabashadu khusayso arrimo farsamo, Guddoomiyaha Gobolku wuxuu u gudbinayaa Guddiga Xallinta Cabashooyinka Diiwaangelinta ee ku xusan qodobka 21-aad ee xeerkan, si ay u xalliyaan arrinta laga cabanayo.
3. Cabasho kasta waxaa go'aan looga gaarayaa muddo toban (10) cisho gudahood ah.
4. Go'aanka waxaa la gaarsiinayaa dhinacyada ay khusayso, waxaana lagu dhejinayaa xafiisyada guddiga, iyadoo lagu faafinayo mareegta Guddigu ku leeyahay internetka.

GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR
المحامي العام للدولة

Qodobka 24-aad
Guddiga Xallinta Cabashooyinka Diiwaangelinta Cod-bixiyayaasha

1. Xeerkani wuxuu asaasayaa Guddiga Xallinta Cabashooyinka Diiwaangelinta Cod-bixiyayaasha oo awood u leh go'aan ka gaaridda cabashooyinka la xiriira Diiwaangelinta Cod-bixiyayaasha.
2. Guddiga Xallinta Cabashooyinka Diiwaangelinta Cod-bixiyayaasha ee maamul, waxaa xarun u ah Xarunta Guud ee Guddiga Doorashooyinka.
3. Guddiga Xallinta Cabashooyinka wuxuu ka kooban yahay todobo (7) xubnood oo kala ah: -
   b. Saddex (3) xubnood oo ka tirsan Guddiga.
   t. La-taliyaha arrimaha sharciga ee Guddiga.
   j. Madaxa Waaxda Diiwaangelinta Guddiga.
   x. Madaxa Waaxda Hawl-gelinta ee Guddiga.
   Kh. Madaxa Waaxda Farsamada ee Guddiga.
4. Inta ay socoto Diiwaangelinta Cod-bixiyayaasha waxay xubnaha Guddiga Xallinta Cabashooyinka Diiwaangelinta ee maamul ka hawl-geli karaan kolba gobolka ay ka socoto Diiwaangelinta, iyagoo cabashooyinka soo gaara go'aan uga gaaraya muddo aan ka badnayn toban (10) cisho.

CUTUBKA 5-AAD
SOO SAARISTA LIISKA KAMA DAMBAYSTA AH EE DIIWAANGELINTA

Qodobka 25-aad
Diiwaanka Cod-bixiyayaasha ee Kama Dambaysta ah

1. Guddigu markuu saxo khaladaadka go'aanna uu ka gaaro cabashooyinka, wuxuu soo saarayaa diiwaanka Cod-bixiyayaasha ee kama dambaysta ah, kaasoo u qaabeysan heer Gobol, Degmo iyo Goob cod-bixineed.
2. Diiwaanka cod-bixiyaha wuxuu noqonayaa xog lagu kaydiyo qalabka kombiyuutarka, waana diiwaan kulmiya dhammaan xogaha laga qoro muwaadinka loo diiwaangeliyey cod-bixiye.
3. Diiwaanka Cod-bixiyayaasha waa hanti dawladeed, Guddiga ayaana u xil-saaran xafididda iyo ilaalintiisa.
4. Waxaa reebban in xogta iyo macluumaadka ku jira diiwaanka Cod-bixiyayaasha laga saaro Puntland gudaheeda.

Qodobka 26-aad
Kaadhka Cod-Bixiyaha

Kaadhka cod-bixiyaha waa inuu ka sameysan yahay aalad aan si fudud u burburayn ama macluumaadku uga tirmi karin, aan la been abuuri karin ama wax laga beddeli karin.

Qodobka 27-aad
Qaybinta Kaadhka Cod-Bixinta

1. Qof kasta oo ku jira diiwaanka cod-bixinta ee kama dambeysta ahi wuxuu xaq u leeyahay in la siiyo kaadhka cod-bixinta.
2. Kaadhka cod-bixinta waxaa ku qoran macluumaadka soo socda: -
   b. Magaca qofka oo afaran.
   t. Sawirka cod-bixiyaha.
   j. Lambarka warqadda aqoonsiga.
   x. Lambarka tixraaca diiwaanka cod-bixiyaha.
   kh. Sannadka, bisha, maalinta iyo goobta dhalashada.
   d. Jinsiga (dhedig ama lab).
   r. Goobta Doorashada uu cod-bixiyuhu ka dhiibanayo codka.
3. Qof kasta oo uu ka xumaaday, ama uu ka lumay kaadhka cod-codbixinta, Guddigu markuu hubiyo in qofku diiwaan-gashan yahay, waxaa la siinayaa kaadh cusub.
4. Nuqullada ka mid ah diiwaanka Cod-bixiyayaasha waxaa la siinayaa Ururrada/xisbiyada Siyaasadda.
5. Xafiisyada Gobollada Guddiga waxaa la siinayaa nuqullo ku saabsan diiwaanka Cod-bixiyayaasha ee gobolkaasi oo u kala qaybsan degmooyinka, deegaannada iyo goobaha cod-bixinta.

Qodobka 28-aad
Lumista Kaadhka Cod-Bixinta

1. Qof kasta oo uu ka lumo kaadhka cod-bixinta, waa inuu muddo aan ka badneyn afar iyo toban (14) maalmood ku wargeliyaa Saldhiga Booliska ee ugu dhow.
2. Boolisku markuu hubiyo lumidda kaadhka cod-bixinta, wuxuu soo siinayaa codsadaha caddayn ku socota xafiiska Guddiga Gobolka ama Degmada ay khusayso.
3. Xafiiska Guddigu ama wakiilka heer Degmo ama Gobol soddon (30) maalmood gudaheeda ayuu ku siinayaa cod-bixiyaha kaadh cusub oo leh tixraaca kii lumay.

GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR

4. Qofka uu ka xumaado kaadhka cod-bixiyaha waa inuu geeyaa codsi uu ku lifaaqan yahay kaadhkii xumaaday xarunta Guddiga.

Qodobka 29-aad
Wax-Ka-Beddelka Diiwaanka Cod-bixiyaha Rasmiga ah

1. Guddigu wuxuu wax-ka-beddel ku samayn karaa diiwaanka kama dambaysta ah ugu dambayn soddon (30) maalmood ka hor doorasho kasta, haddii ay duruufi keento.
2. Waxaa diiwaanka lagu darayaa muwaadiniinta buuxiyey shuruudaha Diiwaangelinta ee aan ku jirin diiwaankii hore, waxaana laga saarayaa inta geeriyootay ee ku jirtey diiwaankii hore.
3. Muwaadiniinta doonaya in ay wax-ka-beddelaan xogtooda shakhsi sida sawirka qofka iyo goobta codaynta, waxaa fursad loo siinayaa in ay wax-ka-beddelkaasi samayn karaan muddada doorashada ka horeysa, waana in ay saxiixaan foomka wax-ka-beddelka xogta qofka.
4. Muwaadiniinta ku jira liisaska Cod-bixiyayaasha ee kama dambeysta ah oo kaliya ayaa xaq u leh codeynta.

Qodobka 30-aad
Waxyaabaha ka Reebban Cod-bixiyaha

Waxaa reebban: -

1. In cod-bixiyuhu qaato hal kaadh wax ka badan.
2. In cod-bixiyuhu uu ka been sheego xogtiisa shaqsiga ah ee diiwaanka loo geliyey.

Qodobka 31-aad
Xogta Khaldanta

Haddii xog khaldani ku jirto diiwaanka cod-bixinta ee kama dambeysta ah, wax saameyn ah ku yeelan mayso dhaqan galka diiwaanka intiisa kale, Guddiga ayaa awood u leh sixidda xogaha khaldan, inta aan la gaarin doorashada xigta.

CUTUBKA 6-AAD
WACYI-GELINTA DIIWAANGELINTA

Qodobka 32-aad
Wacyi-Gelinta Diiwaangelinta Cod-bixiyayaasha

1. Guddigu wuxuu u diyaarinayaa qorshe wacyi-gelin dadweynaha ah, si loogu baraarujiyo muhiimadda Diiwaangelinta iyo habka ay isu-diiwaangelin karaan, wuxuuna isticmaalayaa hababka ugu fudud ee dadka loogu gudbin karo wacyi-gelinta sida, suugaan, farriimaha saxaafadda, baraha bulshada, taleefannada, boorar iyo cod baahiyayaasha wareega IWM.
2. Wacyi-gelinta Diiwaangelinta waxaa lala kaashanayaa xirfadleyda fanka iyo suugaanta, wax-garadka, Ururrada/xisbiyada siyaasadda iyo Ururrada aan dawliga ahayn.

Qodobka 33-aad
Tiirarka Wacyi-gelinta

Wacyi-gelintu waa inay ahaataa mid si fudud ugu gudbisa dadweynaha arrimaha soo socda:-

b. Shuruudaha Diiwaangelinta.
t. Hannaanka Diiwaangelinta.
j. Waraaqaha aqoonsiga ee qofka looga baahan yahay.
x. Goobta iyo saacadaha Diiwaangelinta.
kh. Wakhtiga kama dambaysta ah ee qofku is diiwaangelin karo.
d. Ilaalinta anshaxa goobta Diiwaangelinta.

CUTUBKA 7-AAD
QODOBO GUUD

Qodobka 34-aad
Lahaanshaha iyo Haynta Diiwaanka

1. Diiwaanka cod-bixinta wuxuu ka mid yahay hantida Dawladda Puntland.
2. Urur/xisbi kasta wuxuu xaq u leeyahay inuu la socdo habaynta, dhaqan-gelinta iyo daabacaadda liisaska diiwaanka.
3. Kaydinta iyo maamulidda diiwaanka cod-bixinta, waxaa ka mas'uul ah Guddiga.

Qodobka 35-aad
Ciqaabaha La Xiriira Xad-gudubyada Diiwaangelinta

1. Qof kasta oo ay ku caddaato inuu qaatay hal kaadh wax-ka-badan ama si ula kac ah uga been sheega xogtiisa shaqsiga ah ee diiwaanka loo geliyey waxaa lagu ciqaabayaa, xabsi ah ilaa hal (1) sano, ama ganaax ah $500 (shan boqol oo doolar) ama shilin soomaali u dhigma.
2. Qofkii is diiwaangeliya hal mar wax-ka-badan ama qaata hal kaadh wax ka badan wuxuu luminayaa xaqa cod-bixinta doorashada wakhtigaas la isu diiwaangelinayo.
3. Qof kasta oo hawl-wadeen ka ah hawlaha Diiwaangelinta ee ku xad-gudba qodobada Xeerkan, waxaa lagu ciqaabayaa xabsi u dhexeeya saddex ilaa shan (3-5) sano.
4. Qof kasta oo been abuura kaadhka Diiwaangelinta waxaa lagu xukumayaa ciqaab xabsi ah oo u dhexeysa saddex ilaa shan (3-5) sano.

Qodobka 36-aad
Reebbanaanta Olole Ka samaynta Goobta Diiwaangelinta

Waxaa reebban in goobta Diiwaangelinta lagu sameeyo olole iyo xayeysiin Urur/xisbi siyaasadeed.

Qodobka 37-aad
Xeer-Nidaamiyeyaal

Guddigu wuxuu soo saari karaa Xeer-nidaamiyeyaal lagu fuliyo Xeerkan oo la xiriira: -

1. Arrin kasta oo uu Xeerkani qeexayo in Xeer nidaamiye loo sameeyo.
2. Hirgelinta iyo fulinta hawlaha ku xusan Xeerkan.
3. Wixii kale ee loo arko inay muhiim u yihiin in lagu guuleysto ama sare loogu qaado ujeeddooyinka Xeerkan.

Qodobka 38-aad
Burin

1. Waxaa la buriyey Xeer iyo Xeer-nidaamiye kasta oo ka hor imaanaya ama aan la socon karin Xeerkan.
2. Wixii laga waayo Xeerkan waxaa loola noqonayaa Xeerarka kale iyo Dastuurka Puntland.

Qodobka 39-aad
Dhaqan-galka Xeerka

Xeerkan wuxuu dhaqan gelayaa marka Golaha Wakiilladu ansixiyo, Madaxweynaha Dawladda Puntland saxiixo, laguna soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda Puntland.

GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR
المحامي العام للدولة